Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya





# KAALINTA XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE HAGIDDA BAARISTA IYO SOCODSIINTA DACWADAHA CIQAABTA

*April, 2017 Prof. Isse Ahmed Warsame*

©UN Joint Rule of Law Programme Somalia

Supported by UN Joint Rule of Law Programme

Generoulsy Funded by

EUROPEAN UNION

Supporting the Somali New Deal

UKaid

from the British people

## Tusmo

Cutubka 1aad XILALKA XEER ILAALINTA ..... 3
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin: ..... 4
Su'aalo ..... 5
Cutubka 2aad BILLAABASHADA DHAQAAJINTA DACWADAHA CIQAABTA ..... 6
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin: ..... 7
Su'aalo ..... 12
Cutubka 3aad HEERKA GARSUGANIMADA ..... 13
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin: ..... 14
Su'aalo ..... 14
Cutubka 4aad WAQTIGA KA HORREEYA DHEGEYSIGA DACWADDA ..... 15
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin: ..... 16
Su'aalo ..... 18
Cutubka 5aad HEERKA DHEGEYSIGA DACWADDA ..... 19
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin ..... 20
Su'aalo ..... 22
Cutubka 6aad HEERKA DHEGEYSIGA DACWADDA
(FAAHFAAHIN ARRIMO MUHIIM AH) ..... 23
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin: ..... 24
QEYBTA KOWAAD ..... 24
WAREYSIGA MARKHAATIDA IYO EEDEYSANAHA ..... 24
QETBTA LABAAD ..... 24
QEYBTA SADDEXAAD ..... 25
Su'aalo ..... 25
Cutubka 7aad HEERKA DURITAANKA GUUD AHAAN ..... 26[26]
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: ..... 27
Su'aalo ..... 28
Cutubka 8aad RAFCAANKA LOO QAATO MAXKAMADDA RAFCAANKA ..... 29
Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: ..... 30
Su'aalo ..... 31

Cutubka 9$^{aad}$ CABASHADA LOO QAATO MAXKAMADDA SARE .................................... 32

Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: .......................................................... 33

Su'aalo .................................................................................................................................... 33

Cutubka 10$^{aad}$ DIB U EEGISTA LOO QAATO MAXKAMADDA SARE .............................. 34

Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: .......................................................... 35

Su'aalo .................................................................................................................................... 36

Cutubka 11$^{aad}$ HEERKA FULINTA ..................................................................................... 37

Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: .......................................................... 38

Su'aalo .................................................................................................................................... 39

Cutubka 12$^{aad}$ XAFIISKA DIIWAANGELINTA DEMBIYADA ............................................. 40

Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: .......................................................... 41

Su'aalo .................................................................................................................................... 41

Cutubka 13$^{aad}$ ISKAASHIGA CAALAMIGA AH EE XAGGA DEMBIYDA .......................... 42

Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin: .......................................................... 43

QEYBTA KOWAAD .................................................................................................................. 43

QEYBTA LABAAD .................................................................................................................... 44

QEYBTA SADDEXAAD ............................................................................................................ 45

Su'aalo .................................................................................................................................... 46

# Cutubka
# 1aad

## XILALKA XEER ILAALINTA

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin:

1. In ka qeybgalayaasha tababarka ay si fiican u fahmaan xilalka Xeer Ilaalinta. Iyo habraacyada loo marayo gudashada xilalkaas.
2. 
3. In Xeer Ilaaliyaashu ay ku feejignaadaan in ay qabtaan hawlo ka baxsan waajibaadkooda.

In ay fududaato xeer Ilaliyaha in uu qiimeyn karo ilaa xadka uu gutay waajibaadkiisa.

Introduction Xilalka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa ay ku tilmaaman yihiin Qodobka 8aad ee Xeer Sharci Dejineed L. 3 ee 12kii Juun 1962 (Xeerka Nidaamka Garsoorka).Sida qodobkani jideynayo, Xafiiskani waxa uu u xilsaaran yahay Ilaalinta shuruucda dalka iyo daryeelka xquuqda dowladda, hay'adaha guud iyo maatida. Si' haddaba, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud uu xilalkiisa u guto, waxa uu meelmariyaa hawlaha soo socda:

1. Dhaqaajinta dacwadda ciqaabta oo uu u xilsaaran yahay Xeer Ilaaliyaha Guud oo kaashnaya Ku Xigeennadiisa , Saraakiisha iyo Saraakiil Xigeennada ka tirsan Boliiska Garsoorka. Hawlaha dhaqaajinta dacwadda ciqaabta waxa ay isugu jiraan baarista dembiyada iyo ka qeyb galka dhegeysiga dacwadaha ciqaabta.
2. Dhaqaajinta iyo soo dhexgalka dacwadaha madaniga ah marka ay muuqaneyso in dan guud ay jirto.
3. Rafcaan ka qaadashada go'aannada iyo xukunnada madaniga iyo kuwa ciqaabta hadba sida uu sharcigu qabo.
4. Hoggaamiinta iyo hagidda hawlaha hubinta iyo cadaadinta dembiyada ee uu Boliisku meelmariyo (Fiiri Tirsiga 4aad ee Qod. 12 XHC).
5. Ilaalinta xabsiyada iyo xaruma ciqaabeedka kale.

Si waafaqsan qodobka kor ku xusan, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu awood u leeyahay in uu ku tallaabsado dhammaan wixii hawlo ah ee lagu xaqiijinayo gudashada saddexda xil ee kor kutilmaaman. Xafiiskan, oo ka mid ah garsoorka, waxa uu u xilsaaran yahay dacwad oogista, halka maxkamaduhu ay u xilsaaran yihiin dacwad qaadista.Waqtigan xaadirka ah, tirada Ku Xigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud waa 28 Xeer Ilaaliye oo uu ku jiro Ku Xigeenka Koowaad ee Xeer Ilaaliyaha Guud. Xeer Ilaaliyayaashu waxey ku habeysan yihiin qaab xoogag shaqo sida Xoogga Shaqo ee Dembiyada Lidka Ku ah Jinsiga, Xoogga Shaqo ee Xabsiyada, Xoogga Shaqo ee Xiriirka Boliiska, Xoogga Shaqo ee Dacwad Oogista. Waxaa kale oo uu Xafiisku leeyahay Xafiiska Diiwaniyaha Guud. Sidoo kale, wuxuu Xafiisku leeyahay Kaaliyayaal, Gaarsiiyayaal iyo Hawlwadeeeno kale oo Xafiiska gacan siiya sida: Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda, Waaxda Shaqaalaha, Waaxda Internetka iwm.

Xafiisku waa heer federal wax uuna u xilsaaran yahay in uu ka hawl galo dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka. Wuxuu Xafiisku leeyahay Xeer Ilaaliyayaal ka hawlgala Maxkmadaha kala duwan ee ka furan gobollada iyo degmooyinka dalka, ayna ku ku jirto Maxkmadda Sare. Sharci ahaan waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud matala saraakiisha Boliiska haddii uusan halkaas ka hawlgelin Xeer Ilaaliye ka socda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Hawlaha Xafiiska Xeerr Ilaaliyaha Guud waxaa la isugu soo ururin karaa laba nooc oo waaweyn:

A. Hawlo ku saabsan waxyaabo maxkamadaha laga dalbanayo sida in eedeysanaha lagu xukumo dembi tilmaaman ama in la sii daayo haddii ay jirto asbaab saldhig u noqon karta. Codsiyadan oo noqon kara kuwo ku saabsan dulucda iyo kuwo ku saabsan habraaca, waxaa loo gudbinayaa maxkamadaha oo iyagu go'aan ka qaadanayo.

B. Hawlo ku saabsan waxyaabo la xaqiijinayo sida:

- Meelmarinta iyo hagidda hawlaha baarista dembiyada;
- Caddeymaha laga qorayo dhibbanayaasha fal dembiyeedyada iyo markhaatida;
- Wareysiyada laga qaado eedeysanaha iyo eedeysanayaal lagu heysto dembiyo isku xiran.

## Su'aalo

1. Waa maxay Xilalka xeer Ilaalinta?
2. Hawlaha Xeer Ilaalinta waa imisa nooc? Sharraxaad ka bixi nooc kasta.
3. Goorma ayey Xeer Ilaaintu dhaqaajin kartaa ama dhexgeli kartaa dacwad madani ah?

# Cutubka
# 2aad

## BILLAABASHADA DHAQAAJINTA DACWADAHA CIQAABTA

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin:

1. In si fiican loo fahmo hawlaha Xeer Ilaalinta ee la xiriira billaabashada dhaqaajinta dacwadda ciqaabta ah.
2. In la fahmo goorta ay billaabato dhaqaajinta dacwadda ciqaabta.
3. In la kala ogaado xaaladaha qof la soo xiri karo amar soo qabasho la'aantiis iyo xaaladaha loo baahan yahay in la helo amar soo qabasho.
4. In Xeer Ilaaliyaha uu ka feejignaado Boliiska Garsoorkana ka ilaaliyo in qof lagu xiro si aan sharciga waafaqsaneyn.

Hawsha ugu ballaaran ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa dhaqaajinta dacwadaha ciqaabta. Xeerka Habka Ciqaabta (Xeer Sharci Dejineed L. 1 ee 1da

**Juun (1963)** ayaa habeynaya qaababka kala duwan ee Xafiisku u gudan karo hawshaas.

Dhaqaajitna dacwadda ciqaabta waxa ay ka billaabaneysaa marka eedeysanaha la soo qabto ama la doonayo in la soo qabto.Waajibaadka Xafiiska ee la doonayo in lagu dhaqaaqo marka la joogo heerkan waxaa soo hoos gelaya hoggaaminta, baarista iyo hagidda Boliiska Garsoorka.Waxyaabaha laga doonayo Xafiiska marka heerkan la joogo waxaa ka mid ah:

1. Xaqiijinta in la dhawro qodobbada habeynaya xarigga eedeysanaha guudahaan iyo xaaladaha loo baahan yahay in loo helo amar soo qabasho ee garsoore ka soo baxay iyo kuwa aan loo baahneyn (Qod.28-45 XHC):

1.1. Guud ahaan, waxaa loo baahan yahay in xariggu u dhaco sida sharcigu tilmaamayo. Hawl wadeenka fulinaya xarigga waxaa u bannaan in uu isticmaalo qaab kasta oo sharcigu oggol yahay marka qofka la xirayo uu isku dayo in uu iska caabin ku kaco ama in uu baxsado. Qofka xarigga fulinaya waxaa u bannaan in uu amar la'aan galo goob kasta oo qofka la soo qabanayo uu ku dhuumaaleysanayo haddii ay jirto baahi weyn oo arrintaas loo qabo lagana cabsanayo in qofka la xirayo uu baxsado ka hor inta laga soo saarayo amar goobta lagu baarayo. Sidoo kale, waxaa qofka xarigga fulinaya u bannaan in uu fatasho qofka la xirayo, goobta xarigga laga fulinayo iyo goobihii uu qofka la xirayo ku dhuumaaleysanayay muddadii la daba joogay. Ugu dambeystii, waxaa waajib ku ah Taliyaha Saldhigga Boliiska ee qofka lagu xiray in uu si dhaqso ah xarigga ugu wargeliyo Xeer Ilaalinta iyo Maxkamadda ikhtisaaska u leh, iyo in uu eedeysanaha xiran ku horkeeno muddo 48 saacdood gudahood ah.

1.2. Xarigga amar la'aaneed waxa uu imaan karaa marka la helo xaaladaha uu sharcigu tilmaamayo. Garsooraha, Xeer Ilaaliyaha iyo Sarkaalka Boliiska ayaa amar la'aan qof soo xiri kara hadba sida sharcigu qabo. Sidoo kale, qofka caadiga ah isna waxa uu sameyn karaa xarig amar la'aaneed marka la helo xaaladaha ku tilmaaman Qod. 35 XHC. Markan oo kale, waxaa qofka caadiga ah laga doonayaa in uu qofka uu soo qabtay si deg deg ah ugu wareejiyo Sarkaal Boliis ah. Qod. 35 XHC waxa uu tilmaamayaa xaaladaha ay waajib tahay in la soo xiro qof faraha kula jira dembiyada qodobkaas ku tilmaaman.

Dembi fara kula jirid waxa ay ku tilmaaman tahay Qod. 37 XHC, waxa ayna imaan kartaa marka qofka la qabto isagoo dembigii sameynaya, la eryado isla markii uu dembiga galay sidaasna lagu soo qabto ama lagu qabto walxo ama raad muujinaya in uu yahay qofkii dembiga galay. Waxaa jira xaalado ay bannaan tahay in qofka la soo qabto haddii uu dembiga faraha kula jiro. Xaaladahan waxa ay la xiriiraan dembiyada ku tilmaaman Qod. 36 XHC. Waxaa intaas dheer, waxaa jira xaalado amar la'aan la soo xiri karo dad lagu tuhunsan yahay in ay dembi galeen. Shuruudaha dadkan lagu soo xiri karo waxa ay ku tilmaaman yihiin Qod. 38 XHC, waana sida soo socota:

a. Waa in qofka la soo xirayo lagu tuhunsan yahay in uu galay dembi ciqaabtiisu ka badan tahay 10 sano oo xarig ah.

b. Waa in aan si dhaqso ah loo soo saari karin amar soo qabasho lagana cabsanayo in qofka uu baxsado inta lagu maqan yahay amarka soo qabashada.

c. Waa in qofka uu Sarkaalka Boliiska u diido in uu siiyo magaciisa iyo cinwaankiisa ama uu bixiyo macluumaad been ah sida uu qabo tirsiga 2aad ee Qod. 50 XHC.

1.3. Xarigga ku saleysan amar soo qabasho waa qaab sharcigu tilmaamayo oo qof loo soo xiri karo. Marka la soo saarayo amar soo qabasho waxaa loo baahan yahay in la hubiyo in dembi uu dhacay uuna eedeysanuhu yahay qofka galay. Amarka soo qabasho waxaa soo saari kara garsooraha ikhtisaaska u leh wixii ka horreeya billaabashada dhegeysiga dacwadda. Guddoomiyaha Maxkmadda ikhtisaaska leh ayaa soo saari karo amarka soo qabashada heer kale ee kasta ee dacwadddu mareyso. Waxaa jira xaalado ay waajib tahay in la soo saaro amar soo qabasho iyo xaalado ay bannaan tahay. Xaaladaha ay waajibka tahay soo saaridda amarka soo qabasho waxaa ka mid ah marka arrintu ku saabsan tahay fal dembiyeedyada ku xusan Qod. 35aad, marka dembigu yahay mid ciqaabtiisa ugu badan ay ka yareyn 10 sano iyo wixii ka sii badan iyo mar kasta ee kale ee sharcigu (مكرر) waajibinayo soo saaridda amarka soo qabashada.

Xaaladaha ay bannaan tahay soo saaridda amarka soo qabasho waxaa ka mid ah marka ciqaabta ugu yar ee dembiga eedeysanaha loo heysto ay ka yareyn 6 bilood iyo dhammaan xaaladaha kale ee sharcigu oggolaanayo in la soo saaro amar soo qabasho. Waxaa kale oo ay bannaan tahay soo saaridda amarka soo qabasho marka eedeysanaha lagu amray in uu Maxkmadda horyimaado lagana cabasanyo in uu dalka ka baxsado ama uu maxkamadda ka baaqdo iyo marka uu ku imaan waayo waqtigii loo qabtay iyo goobtii lagu ballamiyay sida lagu sheegay amarka maxkamad hor imaashaha. Fulinta amarka soo qabashada waxaa u xilsaaran Saraakiisha Boliiska.

Haddii amarka soo qabashadu la xiriiro haweeney uur leh ama ilmo nuujineyso iyo qof ku sugan xaalad caafimaad oo aad u liidato, waxaa garsooraha soo saaray uu amri karaa in fulinta amarka la hakiyo ilaa xaaladaha dadkaas ay is beddelayaan.

Haddii goobta lagu fulinayo amarka soo qabasho ay tahay mid si gaar ahaaneed loo leeyahay amarka soo qabasho lama fulin karo waqti ka baxsan inta u dhexeysa 6da subaxnimo ilaa 7da fiidnimo. Sarkaalka fulinaya amarka soo qabasho waa in uu u sheego qofka la soo qabanyo nuxurka amarka soo qabasho uuna nuqulka ka mid ah amarkaas guddoonsiiyo markii ay suuragal u noqoto.

1.4. **Si waafaqsan Qod. 41 XHC, amarka soo qabasho waa in lagu soo saaro laba nuqul oo orijinaal ah waana in lagu caddeeyo:**

i) Magaca Maxkamadda soo saartay;

ii) Taariikhda la soo saaray;

iii) Macluumaadka ku saabsan eedeysanaha ama, haddii aan la heli karin, wixii kale ee si macquul ah loogu aqoonsan karo;

iv) Faldembiyeedka loo heysto eedeysanaha;

v) Saxiixa garsooraha soo saaray iyo tiimbaraha Maxkamadda uu ka soo baxay.

Si kastaba, eedeysanaha lagu soo xiro amar soo qabasho lama sii deyn karo iyadoo sii deynta loo cusknayo daldaloollo uu leeyahay amrkaas.

2. Xaqiijinta in boliiska garsoorku uu sameeyo wargelinta ku saabsan in uu dembi dhacay loona soo xiray qof tilmaaman. Wargelintan oo loo yaqaan taar waa in si deg deg ah loogu soo gudbiyo Maxkmadaha iyo Xeer Ilaalinta (Qod. 33 XHC). Waxaa jira qaabab kale oo Xeer Ilaaliyaha Guud ku helo wargelinta dembi dhacay. Qaababkaan wasxaa ka mid ah:

2.1. Ka soo warbixinta dembi dhacay. Saraakaalka Guud iyo hawlwadeenka u xilsaaran adeegga guud ee ka warhela wargelin ku saabsan dembi dhacay waxaa laga doonayaa in ay si deg deg ah warbixin ku siiyaan Garsooraha, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Sarkaalka Boliiska (Qod.18 XHC).

2.2. Warqadda dhaawac muujinta. Qofka ku shaqeysta xirfadda caafimaadka ee kaalmo ka geysta ama ka hawlgala xaalado muujinaya faldembiyeed xafiis ahaan loo dhaqaajin karo waxaa laga doonayaa in uu si dhaqso ah warqadda dhawwac muujinta ugu soo gudbiyo Garsooraha, Xeer Ilaaliyaha Guud ama Sarkaalka Boliiska. Waajibkan waa uu ka dhacayaa hawlwadeenka caafimaad haddii warqadda dhaawac muujinta ay sabab u noqoneyso in qofka uu caafimaadkiisa baarayay lagu qaado dacwad ciqaab ah (Qod. 19 XHC).

2.3. Soo sheegidda dembi dhacay. Qof kasta ayaa soo sheegi kara dembi dhacay haddii xaataa uusan dhibbane ka aheyn. Hase yeeshee, qofka muwaadinka ah ee ogaada faldembiyeed dhacay ee lid ku ah shakhsiyadda Dowladda ee ciqaabtiisu tahay dil ama xabsi daa'im waxaa waajib ku ah in uu si deg deg ah ugu soo sheego Garsooraha, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ama Sarkaalka Boliiska (Qod. 20 XHC).

2.4. Arji dhaqaajin dacwad ciqaab ah. Dhibbanaha faldembiyeed aan xafiis ahaan loo dhaqaajin karin waxaa u bannaan in uu arji dhaqaajin dacwad ciqaab ah u gudbiyo Garsooraha, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ama Sarkaalka Boliiska muddo bil gudaheed ah laga billaabo marka uu ogaaday faldembiyeedka dhacay.

Xaqa arjiga dhaqaajinta dacwadda ciqaabta ah wuu dhacayaa haddii dhibbanuhu:

a. Uu si cad ama si dahsoon uga tanaasulay;

b. Uu furtay dacwad maddani ah ee ku saabsan magdhawga waxyeelladii ka soo gaartay faldembiyeedka;

c. Uu heshiis ka qaatay waxyeellada soo gaartay (Qod. 21 XHC iyo Qod. 81-89 XC.

2.5. Qaababka wargelinta dembi dhacay ee kor ku xusan waa in Garsooraha, Xafiiska Xeer Ilaaiyaha Guud iyo Sarkaalka Boliiska qoraal ahaan ama af ahaan loogu gudbiyo. Marka qoraal ahaan loo gudbinayo waa in uu saxiixo qofka gudbinaya. Haddiise af ahaan loogu gudbinayo, waxaa mas'uuliinta loo gudbinayo laga doonayaa in maxdar lagu qoro, loo akhriyo lagana saxiixo qofka soo gudbinayo (Qod. 22 XHC).

Baarista hordhaca ah ee dembiga ayaa billaabaneyso marka la helo wargelinta dembiga ee ku imaaneyso qaababka kor lagu soo tilmaamay. Qaababkan wargelinta waa kuwa uu sharcigu habeynayo. Waxaase jira qaab wargelineed oo kale oo sharcigu uusan habeynin sida wargelinta saxaafadda, ama midda uu sameeyo qof magaciisa qariyay. Waxaa loo baahan yahay in qaababka kala duwan ee wargelinta dembiga lagu qoro diiwaan u gaar ah, kaas oo loo baahan yahay in uu yaallo Xafiiska Xeer Ilaalliyaha Guud oo laga doonayo in uu ku daba galo Boliiska Garsoorka tallaabooyinka baariseed ee ay ka qaadayaan wargelinta dembiga.

2. Xaqiijinta in eedeysanaha la horgeeyo Garsooraha Maxkamadda ikhtisaaska leh ama haddii taasi ay fududeyn, Garsooraha Maxkamadda ugu dhaw goobta xarigga muddo 48 saacadood aan dhaafsiisneyn gudaheeda (fiiri Qod. 39, 45 XHC iyo Tirsiga 5aad ee Qod. 35 Dastuurka Ku Meel Gaarka). Mas'uuliyadda tooska ah ee horgeynta eedeysanaha waxa ay saaran tahay Boliiska Garsoorka, iyadoo Xeer Ilaainta iyana laga doonayo in ay ku daba gasho. Sarkaalka Boliiska ee horgeynta sameynaya waa in uu Garsooraha u gudbiyaa warbixin kooban oo uu:

a. Ku soo bandhigayo falalka iyo sababaha xarigga keenay;

b. Ku bixinayo sharraxaad ku saabsan caddeymaha uu soo ururiyay;

c. Ku muujinayo, hadba intii suurgal ah, magacyada qofka la xiray, dhibbanaha iyo markhaatida. Garsooraha la horgeeyo qofka xiran waxa uu darsayaa warbixinta kooban ee loo soo gudbiyay isagoo xabsi xalaaleyn sameynaya haddii ay u caddaato in xarigga eedeysanaha uu yahay mid si sharciga waafaqsan u dhacay. Haddiise ay u muuqato in xariggu uu yahay sharci darro waxa uu sii deynayaa eedeysanaha. Haddii garsooruhu sameeyo xabsi xalaaleyn waa in uu eedeysanaha ku wargeliyaa in uu ku khasbaneyn in uu wax caddeyn ah bixinyo xilligan, balse haddii uu bixiyo loo isticmaali karo caddeyn ahaan si isaga lid ku ah.

   Garsooruhu ma wareysan karo qofka xiran haddii uusan isagu rabin in uu caddeyn bixiyo isagoo markaas weydiin kara wixii su'aalo ah oo caddeynta uu bixiyay ka dhalan kara. Go'aannada uu Garsooruhu ka qaato eedeysanaha la horkeenay waa in lagu wargleiyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud. Kallinta Xeer Ilaantu ku leedahay horgeynta waa in ay hagto Sarkaalka Boliiska si uu Maxkamadda ugu gudbiyo warrbixin tifaftiran.

3. Xaqiijinta in baaruhu uu sameeysto isticmaalana xusuus qorka baarista sida uu qabo Qod. 25 XHC. Xusuus qorkan waa in si maalinle ah loogu qoro sida baaristu u socoto, iyadoo si gaar ah loogu muujinnayo:

   i) Taariikhda ay billaabatay iyo midda ay dhammaatay;

   ii) Hawlaha baariseed ee qabsoomay muddadii baaristu socotay;

   iii) Duruufaha ka dhashay baarista;

   iv) Waxyaabaha caddeymaha ah ee la soo ururiyay;

   v) Awaamirta ka soo baxday Garsooraha, Xafiiska Xeer Ilaaiyaha Guud iyo madaxda Boliiska Garsoorka.

   Xeer Ilaaiyaha Guud ama Ku Xigeenadiisa ayaa u xilsaaran in ay xaqiijiyaan in baarayaashu ay heystaan xasuus qorka baarista kuna qoraan dhammaan macluumaadka ku saabsan baarista.

4. Xaqiijinta in baaruhu soo qoro gungaarka baarista si aan dib u dhac laheyn iyadoo la dabbaqayo Qod. 26 XHC. Gungaarka waa warbixin dhammeestiran oo ku saabsan baarista. Gungaarku waxa uu lagama maarmaan u yahay go'aan ka qaadashada qoridda xaashida eedda eedeysanaha, iyadoo dib u dhaca ku yimaada soo gudbinta gungaarka uu sabab u noqon karo in eedeysanuhu muddo dhaaf ku noqodo xabsiga. Si' haddaba, dib u dhacaas looga samata baxo waxaa loo baahan yahay in Xeer Ilaalintu u qabato Boliiska Garsoorka muddo looga baahan yahay in uu ku soo gudbiyo gungaarka. Marka muddadaas loo qabanayo Boliiska Garsooka waa in la tixgeliyo muddooyinka garsuganimada sida ku xusan Qod. 47 XHC. Waxaa kale ee loo baahan yahay in lagu baraarugsanaado in baarista la sameeyo kadib markii muddada garsuganimadu dhammaato aanna la soo cusbooneysiin ay tahay waxbakama jiraan.

Marka dacwadda ciqaabtu ay mareyso heerka billaabashada dacwadda ciqaabta waxaa inta badan dhaca xadgudubyo sharciga looga tallaabsanayo iyadoo lagu tumanayo xuquuqda eedeysanaha.Waxaa xadgudubyadaas tusaale u ah in Boliiska Garsoorka uu eedeysanaha iska heysto muddo ka badan 48 saacadood iydoo aan Xafiiska Xeer Ilaalinta iyo Maxkamadda aan midna lagu soo wargelin.Waxaa jira xadgudubyo kale oo ku saabsan qaabka loo soo qabto eedeysanaha iyo amarka loo cuskado soo qabashadiisa. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa laga doonayaa in uu ka feejignaado xadgudubyada noocaas ah uuna ku mintido dhaqan gelinta dhammaan qodobbada tilmaamaya awoodihiisa marka la marayo heerka billaabashada dacwadda ciqaabta. Heerkan waxaa inta badan habeynaya **Qod.17-45 XHC.**

# Su'aalo

1. Xaaladahee amar soo qabasho loo baahan yahay si qof loo soo xiro?
2. Xaaladahee qof la soo xiri karaa amar soo qabasho la'aantiis?
3. Sheeg saddex waxyaabood oo Xeer Ilaalinta laga doonayo in ay xaqiijiso marka ay billaabaneyso dacwadda ciqaabta.
4. Goorma ayey billaabaneysaa baarista hordhaca ah ee dembiga?
5. Waa maxaay waxyaabaha laga doonayo in laga helo amrka soo qabasho?
6. Waa maxay waajibaadka baaraha?
7. Qaababka wargelinta waa imisa, maxeyse kala yihiin?
8. Yaa ka mas'uul ah in eedeysanaha Garsoore Maxkmadeed lagu horgeeyo, muddada horgeyntuse waa imisa?
9. Maxey yihiin xadgudubyada dhaca heerka billaabashada dacwadda ciqaabta gudihiisa, yaase ku kaca xadugudubyadaas?
10. Waa maxay gungaarka baarista, muxuuse ahmiyad leeyahay?

# Cutubka

# 3aad

# HEERKA GARSUGANIMADA

**Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin:**

1. In la barto muddooyinka kala duwan ee garsuganimada si loo dabbaqo.
2. In la barto awoodda garsooraha ee ku saabsan sii deynta eedeysanaha marka la dhaafo muddooyinka garsuganimada.
3. In la barto waajibaadka saaran Xafiiska Xeer Ilaainta si looga feejignaado mudda dhaafka garsugaha.

Marka heerkan la joogo, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa in uu ku dadaalaa in uu ilaaliyo muddooyinka eedeysanuhu u xirnaan karo garsuganimada. Sida ku tilmaaman Qod. 47 XHC, eedeysanaha waa in la sii daayo haddii aan la muddeynin dacwadda lana soo saarin amarka u soo kaxeynta eedeysanaha Maxkamadda, garsuganimadiisuna ay dhaafto muddooyinka soo socda:

A. 90 maalmood haddii dembigu yahay ikhtisaaska Qeybta aan Caadiga aheyn ama Qeybta Ciqaabta Ciidamada ee Maxkamadda Gobolka ciqaabtiisuna ay tahay dil ama xabsi daamim;
B. 60 maalmood dembiyada kale ee ah ikhtisaaska Qeybta aan Caadiga aheyn ama Qeybta Ciqaabta Ciidamada ee Maxkamadda Gobolka;
C. 45 maalmood haddii dembigu yahay ikhtisaaska Qeybta Caadiga ah ee Maxkamadda Gobolka;
D. 15 maalmood haddii dembigu yahay ikhtisaaska Qeybta Ciqaabta ee Maxkamadda Degmada.

Marka Garsooruhu sii deynayo eedeysanaha muddo dhaafka ah waxa uu dul saari karaa waajibaad la xiriira in la xaqiijiyo in Maxkamadda uu horyimaado haddii loo baahdo. Dib ayaa loo soo xirayaa eedeysanaha muddo dhaafka lagu sii daayay haddii uu ku xadgubo waajibaadka la saaray ama uu dalka ka baxsanayo, iyadoo ay dib ugu billaabaneyso muddo garsuganimo oo horleh. Si looga badbaado sii deynta ku timaado muddo dhaaf, waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud laga doonayaa in uu ku dadaalo in uu Maxkamadda ikhtisaaska leh waqti macquul ah gudihiisa ugu gudbiyo xaashida eedda kana codsado muddeynta dacwadda iyo soo saaridda amarka u soo kaxeynta eedeysanaha Maxkamadda. Marka la diyaarinayo xaashida eedda waa in uu Xeer Ilaalinta soo gaaray gungaarka baarista oo ah midka looga shidaal qaadanyo diyaarinta xaashidaas. Si kastaba, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu codsan karaa in muddaooyinka garsuganimada loo kordhiyo ilaa labalaab haddii ay arrintaasi lagama maarmaan ugu muuqato.

## Su'aalo

1. Maxey kala yihiin muddooyinka garsuganimada
2. Waa maxey awoodda garsooraha haddii garsugaha uu muddo dhaaf noqdo?
3. Waa maxay waajibaadka saaran Xafiiska Xeer Ilaalinta si looga feejignaado muddo dhaafka garsugaha?

# Cutubka
# 4aad

# WAQTIGA KA HORREEYA DHEGEYSIGA DACWADDA

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin:

1. In la fahmo goorta uu billaabanayo waqtigan.
2. In la barto tallaabooyinka kala duwan ee Xeer Ilaalinta looga baahan yahay in ay waqtigan qaaddo.
3. In la ogaado waxyaabaha loo baahan yahay in laga helo xaashida eedda.
4. In la barto qaabka gal xiridda iyo tallaabooyinka xiga ee Maxkamadda laga rabo.

Marka dacwadda ciqaabtu ay heerkan mareyso, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu awood u leeyahay in uu meelmariyo dhammaan hawlaha la xiriira socodsiinta dacwadda ciqaabta. Xilligan waxa uu ku soo beegmayaa mar baaristii boliisku ay soo afjarantay Xafiiskana loo soo gudbiyay gungaarka baarista dembiga loo heysto eedeysanaha.

Hadddaba, Xafiisku waa in uu darso gungaarka isagoo hubinaya in la heli karo caddeymo ku filan in Maxkamadda laga hormuujiyo in dembi dhacay uuna eedeysanuhu yahay qofka galay (**Qod. 70 XHC**). Haddii ay Xafiiska ugu muuqato in caddeymaha noocaas ah la heli karo waxa uu soo diyaarinayaa xaashida eedda isagoo u gudbinaya Maxkamadda ikhtisaaska u leh qaadista dacwadda kana codsanaya in dacwadda la muddeeyo.

Haddii caddeymuhu aysan aheyn kuwo ku filan in ay muujiyaaan in dembi dhacay eedeysanuhuna yahay qofka galay, Xafiisku waxa uu awood u leeyahay in uu ku tallaabsado baaris dheeraad ah ama in uu dacwadda xiro hadba sidii ay arrintu ugu muuqato. Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu Maxkamadda ka codsanayaa in ay ku dhawaaqdo in aan dacwadda la socodsiin karin haddii la helo mid ka mid ah xaaladaha soo socda:

1. Markii ay u caddaato in dembiga uusan dhicin.
2. Markii ay u caddaato in eedeysanuhu uusan aheyn qofka demiba galay.
3. Marka qofka dembiga galay uu yahay qof aan la eedeyn karin sababta oo ah:

3.1. Waa qof waalan;

3.2. Waa qof 14 sano ka yaraa markii uu falku dhacayay;

4. Marka dembigu uu yahay mid baaba'ay, maxaa yeelay:

4.1. Dembilihii ayaa geeriyooday;

4.2. Cafis ayaa dhacay;

4.3. Arjigii dhaqaajinta dacwadda ciqaabta ayaa lala noqday, eedeysanuhuna si cad uma diidin ama waxaa geeriyooday dhibbanihii demiguna waa mid aan la dhaqaajin karin haddii aan arjigaas la helin;

4.4. Waxaa la helay xal fudud.

5. Dacwadda laguma qaadi karo eedeysanaha, maxaa yeelay:

5.1. Arjiga dhaqaajinta dacwadda ciqaabta ayaan la keenin, demiguna waa mid aan la dhaqaajin karin haddii aan arjigaas la  helin;

5.2. Hore ayaa eedeysanaha loogu xukumay ama looga sii daayay isla faldembiyeedka, xukunkuna wuu dhaqan galay;

5.3. qofku waxa uu leeyahay xasaanad lamana helin rukhsadda dhaqaajinta dacwadda;

5.4. Dacwadda ciqaabta lama dhaqaajin karin waqtigii oo dhacay awgeed.

6. Xaashida eedda waa in lagu soo saaraa laba nuqul oo orijinaal ah waana in laga helo macluumaadka soo socda:

   i. Magaca Xeer Ilaalinta soo saartay;

   ii. Taariikhda la soo saaray;

   iii. Macluumaadka ku saabsan eedeysanaha ama, haddii aan la heli karin, wixii kale ee si macquul ah loogu aqoonsan karo;

   iv. Dembiga loo heysto eedeysanaha iyadoo si cad oo kooban loo soo bandhigayo falalka uu dembigu ka kooban yahay,  waqtiga dembiga la galay, goobta lagu galay, qofka laga galay ama waxyaabaha lagu galay;

   v. Magaca faldemiyeedka iyo qodobbada sharciga ee habeynaya;

   vi. Duruufaha dembiga adkeeya, haddii laga reebo ku noqnoqoshada dembiga, iyo duruufaha keeni kara in la dabbaqo tallaabooyin amni, iyadoo la xusayo qodobbada sharci ee loo cuskanayo;

   vii. Macluumaadka dhibbanaha iyo markhaatida;

   viii. Muujinta  haddii eedeysanuhu xiran yahay;

   ix. Saxiixa Xeer Ilaliyaha Guud ama Ku Xigeenka soo saaray iyo tiimbaraha Xeer Ilaainta ay ka soo baxday (Qod. 49 XHC).

Haddii eedeysanaha loo heysto dhowr dembi waa in la siiyo lambarro isku xiga, iyadoo mid kastaba loo dhammeestirayo shuruudaha xaashida eedda sida ku tilmaaman tirsiyada iv., v., vi iyo vii. ee kor ku xusan.  Haddii laba qof iyo wax ka badan ay ku eedeysan yihiin isla xaashida eedda, waa in la caddeeyaa dembiga ama dembiyada mid kasta loo heysto iyadoo eedeysane kasta loo tixgelinayo shuruudaha lagu tilmaamay tirsiyada iii.,iv., v., vi., vii., iyo viii. ee kor ku xusan.

7. Xafiiska Xeer Ilaliyaha Guud ayaa awood u leh in uu xiro gal dacwadeedka ciqaabta haddii ay u muuqato in aan caddeyn ku filan loo heynin in dembi uu dhacay uuna eedeysanuhu yahay qofka galay (Qod. 72 XHC). Si gal xiridda u taaba gasho waxaa loo baahan yahay in ay wada saxiixaan Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Ku Xigeenka soo diyaariyay gal xiridda. Go'aanka galka lagu xiray waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda ikhitsaaska leh iyadoo eedeysanahahana la gaarsiinayo. Marka ay Maxkamaddu hesho go'aanka gal xiridda waxa ay sii deyneysaa eedeysanaha haddii uu xiran yahay. Haddii uu xurriyad ku meelgaar ah ku joogo waxa ay ka qaadeysaa waajibaadkii saarnaa (Qod. 76 XHC). Si kastaba, Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu awood u leeyahay in uu ka noqdo go'aanka gal xiridda haddii uu helo caddeymo ku filan in dembi dhacay uuna eedeysanuhu yahay qofka galay.
8. Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa xilligan laga doonayaa in uu iska hubiyo in dacwadda ciqaabta ah ee uu dhaqaajinayo aanu waqtigu ka dhicin sida ku cad Qod. 73 XHC. Ma jiro waqti ay ku dhacaan dembiyada ay waajibka tahay in laga soo saaro amar soo qabasho si waafaqsan Qod. 42 XHC. Dembiyada kale lama dhaqaajin karo haddii qabsoomidda faldembiyeedka ay ka soo wareegaan waqtiyada soo socda:
    i. 6 sano haddii ciqaabta ugu badan ee dembiga ay ka badan tahay 5 sano;
    ii. 4 sano haddii ciqaabta ugu badan ee dembiga ay ka badan tahay 3 sano;
    iii. 2 sano haddii ciqaabta ugu badan ee dembiga aanay ka badneyn 3 sano;
    iv. 6 bilood haddii ciqaabta dembiga ay tahay ganaax lacageed oo qur ah.

   Haddii eedeysanuhu yahay shaqaale dowlo oo dembiga galay isagoo hawshiisa gudanaya waxa ay muddooyinka la soo xusay ka bilaalbanayaan markuu shaqada ka tago. Si kastaba, waqtiyada uu eedeysanuhu dhuumaaleysanayo ama uu dalka ka maqan yahay laguma xisaabayo muddooyinka dhicitaanka dembiga ee kor ku xusan.

# Su'aalo

1. Maxaa Xeer Ilaalinta u furan haddii ay u caddaato in dembi dhacay, eedeysanuhuna uu yahay qofka galay?
2. Maxaa Xeer Ilaalinta u furan haddii ay u caddaato in uusan dembi dhicin eedeysanuhuna uusan aheyn qofka galay?
3. Sheeg tallaabada Xeer Ilaalinta u furan haddii dembigu yahay mid baaba'ay ama aan eedeysanaha la eedeyn karin.
4. Maxey yihiin asbaabta keeni karta in aan dacwadda ciqaabta la dhaqaajin karin?
5. Maxey kala yihiin dembiyada waqtigoodu dhaco iyo kuwa uusan dhicin?

# Cutubka 5aad

# HEERKA DHEGEYSIGA DACWADDA

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin

1. In la ogaado jawaabaha eedeysanaha u furan kadib marka xaashida eedda loo akhriyo.
2. In sharraxaad laga bixin karo tallaabooyinka ku xiga jawaab kasta oo uu ku jawaabo eedesanaha.
3. In la barto awoodda Xeer Ilaalinta ee dib u habeynta eedda iyo la noqoshadeeda.
4. In la barto siyaabaha dacwaddu u soconeyso iyo waxyaabha kala duwan ee u furan Xeer Ilaalinta iyo eedeysanaha ama qareenkiisa.

Marka ay dacwadda ciqaabtu heerkan mareyso, waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud laga doonayaa in uu si aan madmadow laheyn u caddeeyo in dembigu dhacay uuna yahay eedeysanuhu kan galay dembigaas (Qod. 110, 163 XHC). Heerkan waa waqtiga Maxkamaddu eedeysanaha u jeedineyso dembiga loo heysto iyadoo u akhrinayso xaashida eedda ee uu soo gudbiyay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud una sheegeyso in uu saddex jawaab middood bixin karo:

1. In uu ku jawaabo in uu eedda dood ka qabo si waafaqsan Qod. 105 XHC.

   Haddii eedeysanuhu ku jawaabo in uu eedda dood ka qabo, maxkamadda ayaa dooddaas go'aan ka soo saareyso kadib marka ay dhegeysato ra'yiga Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (Xarafka b) ee Tirsiga kowaad ee Qod.106 XHC). Haddii ay maxkamaddu ku qanacdo doodda hordhaca ah ee eedeysanaha waxa ay caddeyneysaa in aan dacwadda lagu dhaqaajin karin iyadoo raacineyso asbaabta arrintaas keeneyso. Caddeyntaas kadib, maxkamaddu waxa ay amreysaa in eedeysanaha xabsiga laga sii daayo haddii uu xiran yahay, ama in laga rogo waajibaadka la saaray haddii uu xurriyad ku meel gaar ah ku joogo.

2. In uu ku jawaabo in uu dembiga galay.

   Haddii eedeysanuhu ku jawaabo in uu dembiga galay, maxkamaddu waxa ay toos ugu dhawaaqeysaa xukunkeeda haddii ciqaabta ugu badan ee dembiga eedeysanaha loo heysto ay ka yar tahay 10 sanbo. Haddiise maxkamaddu u aragto in jawaabta uu eedeysanuhu bixiyay aysan runta waafaqsaneyn waxa ay amreysaa in dacwadda la wado iyadoo markan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha laga doonayo in uu maxkamadda u soo gudbiyo caddeymaha muujinayo in eedeysanuhu dembiga galay. Haddii ciqaabta ugu badan ee dembiga eedeysanaha loo heysto aysan ka yareyn 10 sano waxaa maxkamadda ay go'aamineysaa in dacwadda la wado.

3. In uu ku jawaabo in uusan dembiga gelin.

   Haddii eedeysanuhu ku jawaabo in uusan dembiga gelin, maxkamaddu waa in ay go'aamisaa in dacwadda la wado. Eedeysanuhu wuu ka noqon karaa caddeynta dafaridda dembiga, haddii maxkamaddu oggolaato, goor kasta oo ka mid ah darajada kowaad ee ka horreysa ku dhawaaqidda xukunka,

isagoo ku baddelaya caddeynta qirashada dembiga. Marka maxkamaddu amarto in dacwadda la wado, waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud laga doonayaa in uu caddeymihiisa maxkmadda u soo gudbiyo marka eedeysanuhu uu ku jawaabo in uusan dembiga gelin (Qod. 110 XHC). Mar kastaba, caddeymuhu waa in ay ahaadaan kuwo ku filan in ay muujiyaan in dembi dhacay uuna eedeysanuhu yahay qofka galay.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa laga doonayaa in uu ku dhaqaaqo hawlaha ku xusan **Qod.114 XHC,** isagoo ka ambaqaadayo marag muujintiisa, si gaar ahna u muujinaya dabiicadda iyo qaababka eedeysanuhu u galay demiga lagu heysto iyo noocyada caddeymaha loo hayo in uu dembiga galay. maxkamaddu waxa ay markaas billaabeysaa in ay qaaddo caddeymaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud. Haddii caddeymaha uu Xafiisku keeno noqon waayaan kuwo ku filan in ay muujiyaan in eedeysanuhu uu dembiile yahay, waxaa u bannaan in uu eedda kala noqodo kadib markii Garsooruhu la tashi ahaan ugu soo jeediyo (**Qod. 115 XHC**). Mar kastaba, waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud u bannaan in uu dib u habeyn ku sameeyo eedda iyo in uu eedda kala noqdo eedeysanaha iyadoo mar walba loo baahan yahay oggolaashaha Garsooraha Maxkamadda (**Qod. 111 iyo 112 XHC**). Haddii eed la noqoshada ay ku saabsan tahay dembi ciqaabtiisu ka badan tahay 3 sano, waxaa loo baahan yahay oggolaasho qoraal ah oo ka soo baxa Xeer Ilaaiyaha Guud.

Kadib markii uu Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud soo bandhigo caddeymihiisa, maxkamaddu waxa ay eedeysanaha ku wargelineysaa in uu keensan karo caddeymo iska rogid ah uuna bixin karo caddeyn ku saabsan dembiga loo heysto isagoo la dhaariyay ama aan la dhaarin labadaba (**Qod. 116 XHC**). Intaas kadib, eedeysanuhu waxa uu billaabayaa hawlaha difaaciisa, isagoo si kooban u soo bandhigayo dabiicadda iyo baaxadda difaaciisa iyo caddeymaha uu doonayo in uu dembiga isaga rogo. Sidaas ayey maxkamaddu ugu tallaabsaneysaa qaadista caddeymaha eedeysanaha.

Haddii eedeysanuhu keeno caddeymo uusan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud hore u saadaalin kareynin si kasta oo uu taxadarka ugu badan sameeyo, maxkamaddu waxa ay Xafiiskan u oggolaan kartaa in uu keeno caddeymo uu ku burrinayo kuwa uu eedeysanuhu keenay (**Qod. 117 XHC**). Haddii taasi dhacdo, waxaa eedeysanuhu isna keeni karaa caddeymo dheeraad ah. maxkmaddu waxa ay awood u leedahay in ay xafiis ahaan u qaaddo caddeymo ay u aragto in ay lagama maarmaan yihiin si xaqiiqada lloo gaaro (**Qod. 118 XHC**).

Haddii caddeymaha la qaado kadib, waxaa loo gudbayaa gabageynta dhegeysiga dacwadda oo uu ku horreynayo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud oo dooddiisa soo gunaanadaya isagoo maxkamadda u gudbinayo faallooyin uu ku muujinayo sida uu dulucda dacwadda u arko iyo wixii sharcigu ka qabo codsanayana in eedeysanaha lagu xukumo dembiga lagu soo eedeeyay. Waxaa markaas isna difaaciisa soo gabagabeynaya eedeysanaha ama qareenkiisa.

Haddii eedeysanuhu leeyahay dhawr qareen waxaa loo baahan yahay in mid kastaba difaciisa ku koobo mowduucyada, doodaha iyo codsiyada aan ay kuwa kale ka hadlin. Waxaa reeban in dhinacyada ay isku jawaabaan haddii aany maxkamaddu u oggolaan iyadoo mar kastaba uu eedeysanuhu hadalka ku dambeynayo (**Qod. 119 XHC**).

## Su'aalo

1. Maxey yihiin tallaabooyinka la qaadayo haddii eedeysanuhu dembiga qirto?
2. Maxey yihiin tallaabooyinka la qaadayo haddii eedeysanuhu dembiga dafiro?
3. Maxey yihiin tallaabooyinka la qaadayo haddii eedeysanuhu ku jawaabo in uu dood hordhac ah qabo?

# Cutubka

# 6aad

# HEERKA DHEGEYSIGA DACWADDA (FAAHFAAHIN ARRIMO MUHIIM AH)

**Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Cutubkan waxa ay yihiin:**

1. Barashada iyo dabbaqaadda noocyada kala duwan ee wareysiyada markhaatida.
2. Barashada macluumaadka la weydiin karo khabiirka.
3. Barashada xaaladaha dhinacyadu codsan karaan in loogu yeero khabiir
4. Barashada iskaabidda markhaatida iyo qiimeyntooda.
5.

## QEYBTA KOWAAD

## WAREYSIGA MARKHAATIDA IYO EEDEYSANAHA

Sida ay qabaan Qod.185, 187, 188iyo 191 XHC, waxaa jira saddex nooc oo markhaatida iyo eedeysanaha loo wareysan karo, kuwaas oo kala ah:

A. Wareysiga asaasiga ah oo ah su'aalaha uu markhaatida weydiiyo dhinaca keensaday. Su'aalaha maragga lagu weydiinayo wareysigan waa in ay noqdaan su'aalo toos ah oo aan tilmaan ka bixineyn jawaabta uu doonayo qofka su'aasha weydiinaya haddii aysan maxkamaddu si gaar ah u oggolaan.

B. Wareysiga rogaal celiska ah oo ah su'aalaha uu markhaatida weydiiyo dhinca ka soo horjeeda dhinaca keensaday. Marka la joogo wareysigan, waxaa qofka maragga wareysanaya loo oggol yahay in uu weydiiyo su'aalo af u gellis ah ama tilmaan ka bixinaya jawaabaha uu rabo qofka wareysiga qaadaya.

C. Dib u warreysiga oo loola jeedo midka uu qaado dhinaca maragga keensaday ka dib wareysiga roogal celiska ah. Sida wareysiga asaasiga ah oo kale, lama oggola marka la joogo dib u wareysiga, su'aalo af u gelis ah ama tilmaan ka bixinaya jawaabaha uu rabo qofka su'aalaha weydiinaya haddii aan maxkamaddu oggolaanin. Waxaa intaas dheer, dib u wareysigu waa in uu ku wajahan yahay iftiimin waxyaabihii maraggu ku sheegay wareysiga rogaal celiska ah.

## QETBTA LABAAD

### RA'YIGA KHABIIRKA

Xafiiska Xeer Ilaliyaha Guud ama eedeysanaha ayaa maxkamadda weydiin karo in la dhegysto ra'yi khabiir sida ay qabaan Qod.157-161 XHC.Sidoo kale, maxkamaddu waxa ay awood u leedahay in iyadu xafiis ahaan u go'aamiso dhegeysiga khabiirka. Waxyaabaha khabiirka loogu yeeri karo waxaa ka mid ah:

i. Macluumaad ku saabsan sharci qalaad;
ii. Arrimo u baahan aqoon cilmiyeed ama mid faneed oo gaar ah;
iii. Qoraallo iyo saxiixyo loo baahan yahay in la ogaado qofka leh;
iv. Macluumaad ku saabsan caadooyinka iyo dhaqanka.

Qofka maxkamaddu ugu yeerto in uu bixiyo ra'yi khabiir waxaa waajib ku ah in uu oggolaado, iyadoo wixii kharaj ah oo uu soo sheegto laga bixinayo khasnadda Dowladda. maxkamadda ayaa ku wargelineyso khabiirka waxa ay yihiin waajibaadkiisa iyada ayaana su'aalaha u jeedineyso iyadoo ay joogaan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo eedeysanaha haddii ay doonayaan. Haddii bixinta ra'yiga khabiirka ay qaadneyso waqti, maxkamadda ayaa u qabaneyso waqti uu qoraal ahaan ugu soo gudbiyo ra'yigiisa, kaas oo la kordhin karo haddii asbaab macquul ah ay jirto. Haddii ra'yiga khabiirka uu af ahaan u baxo waxaa lagu qorayaa maxdarka dacwadda, haddii uu qoraal yahayna waxaa lagu lifaaqayaa maxdarka iyadoo dhinacyada nuqul laga siinayo.

Khabiirka waxaa looga yeeri karaa maxkamadda si marag ahaan loogu dhegysto, kadib markii dhinacyadu codsadaan ama maxkamadda xafiis ahaan u go'aamiso. Ka sokow khabiirka ay maxkamaddu magacawdo, dhinacyadu waxa ay markhaati ahaan u keensan karaan la taliyaal farsamo.

## QEYBTA SADDEXAAD

### ISKAABIDDA CADDEYMAHA IYO QIIMEYNTOODA

Iskaabidda caddeymaha waxaa loola jeedaa caddeyn xoojineyso mid nugul oo aan keligeed xukun lagu saleyn karin, sida markhaati furka uu bixiyo mid ka mid ah eedeysanayaal loo heysto in ay si wadajir ah dembi u galeen. Sharci ahaan, eedeysanayaasha uu kii la eedeysnaa ku markhaati furay laguma xukumi karo dembiga haddii aan la helin caddeymo kale oo markhaati furkaas kaabaya (**Qod. 199 XHC**). Markhaati furka caynkan ah waxaa lagu kaabi karaa caddeymo uu qofka markhaati furayo ka bixiyo duruufaha ku saabsan goobta iyo waqtiga dembiga uu dhacay.

Sidaas darteed, waxa ay maxkamaddu oggolaan kartaa in maragga loo jeediyo su'aalo jawaaabahooda laga dheehan karo caddeymo kaabaya markhaati furkiisa (**Qod. 200 XHC**). Waxaa kale, oo markhaati furka maragga lagu kaabi karaa caddeyn uu hore u bixiyay kuna saabsan arrinta uu ka markhaati furayo, taas oo uu bixiyay waqti ku dhaw goorta dembigu dhacay ama uu siiyay mas'uuliinta baarista arrintaas u xilsaarnaa (Qod. 201 XHC). Maxkamadda ayaa si madax bannaan u qiimeyneyso caddeymaha.(**Qod. 202 XHC**).

## Su'aalo

1. Sheeg wareysida kala duwan ee markhaatida iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin.
2. Maxey yihiin macluumaadka la weydiin karo khabiirka?
3. Sharraxaad ka bixi iskaabidda markhaatida iyo qiimeyntooda.

# Cutubka
## 7aad

# HEERKA DURITAANKA GUUD AHAAN

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:

1. Barashada xaaladaha la duri karo go'aan maxkamadeed iyo qofka xaqa u leh in uu duro.
2. Barashada qaabka loo raaco duritaanka go'aan maxkamadeed.
3. Barashada caddeynta duritaanka iyo asbaabta duritaanka.
4. Barashada muddooyinka duritaanka lagu gudbin karo.
5. Barashada qaabka dhinacyadu uga tanaasuli karaan duritaan ay gudbiyeen.
6. Barashada xaaladaha aan duritaanka la aqbali karin.

Waxaa duritaan xaq u leh qofka uu sharcigu si cad u siiyo, waxaana loo baahan yahay in qofka durayo go'aan ka soo baxay dacwad ciqaab ah uu yahay qof leh dan sharciga waafaqsan oo awgeed wax u duri karo. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ma duri karo go'aanka ku saabsan in aan dacwadda la dhaqaajin karin ee markii la soo saarayay uusan ka dhiiban ra'yi uu uga soo horjeedo. Sidoo kale, Eedeysanuhu ma duri karo xukunka ka soo baxo dembi uu qirtay in uu galay markii eedda loo akhriyay (**Qod. 208 XHC**).

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu duri karaa Go'aannada Maxkamadaha ka soo baxa isagoo uu matalayo Xeerr Ilaaliyaha Guud ama Ku Xigeennadiisa (**Qod. 210 XHC**). Waxaa loo baahan yahay in dhinaca doonaya in uu duro go'aan maxkamadeeduu kaaliyaha maxkamadda soo saartay uu u gudbiyo caddeynta duritaanka oo noqon karta af ama qoraal, isagoo ku muujinaya summadda go'aanka uu durayoo, taariikhdiisa, maxkamadda uu ka soo baxay iyo dacwadda uu ku saabsan yahay (**Qod. 212 iyo 213 XHC**).

Haddii dhinaca duritaanka sameynaya uu xabsi ku jiro, caddeynta duritaanka waxaa ka qabanaya maxkamaddana u gudbinaya mas'uuliinta xabsiga. Caddeynta duritaanka ee uu sameeyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa in lagu gaarsiiyaa eedeysanaha muddo 30 maalmood gudahood ah, hawshaas oo meelmarinteeda laga doonayo kaaliyaha qabtay arjiga duritaankaas (**Qod. 215 XHC**). Asbaabta duritaanka waxaa lagu sheegi karaa isla caddeynta duritaanka ama waxaa lagu gudbin karaa qoraal gaar ah oo dhinaca duritaanka sameynaya ama qof ka wakiil ah uu saxiixay. Waxaa kale, oo Maxkamadda duritaanka loo qaatay loo gudbin karaa raacsiin sii faahfaahineyso asbaabta duritaanka (**Qod. 216 XHC**).

Muddada caddeynta duritaanka la gudbin karo waxa ay ku tilmaaman tahay Qod. 214 XHC waana sida soo socota:

1. 30 maalmood haddii la durayo xukun, taas oo ka billaabaneysaa taariikhda xukunka lagu dhawaaqay,
2. 15 maalmood haddii duritaanku ku saabsan yahay go'aan kale ee maxkamadeed, taas oo ka billaabaneyso marka lagu dhawaaqay ga'aamokaas haddii dhinacyadu wada joogeen ama marka la sameeyay gaarsiinta sharciga ah.

Inta lagu guda jiro muddada lagu duri karo xukun ama go'aan kale ee maxkamadeed iyo muddada uu socdo dhegeysiga dacwadda duritaanka ka dhalata waxaa hakisnaanaya fulinta (Qod. 218 XHC). Midda kale, dhinacyadu wey ka tanaasuli karaan duritaanka ay codsadeen, iyagoo caddeyn arrintaas ku saabsan u gudbinaya Kaaliyaha Maxkamadda soo saartay xukunka ama go'aanka la duray. Sidoo kale, ka tanaasulidda duritaanka waxaa Maxkamadda loo gudbin karaa marka la dhegeysanayo dacwadda duritaanka, iyadoo lagu qorayo maxdarka dacwadda. Haddii duritaanka uu soo gudbiyay Xeer Ilaaliyaha Guud ama Ku Xigeenkiisa, U Doodaha Dadweynaha kama tanaasuli karo haddii uu oggolaasho ka heysan Xeer Ilaaliyaha Guud (**Qod. 221 XHC**).

Waxaa la duri karaa go'aannada soo baxay heerka ka horreeya dhegeysiga dacwadda haddii ay yihiin kuwo dacwadda dhammeynaya oo keliya. Go'aannada soo baxa inta dhegeysiga dacwaddu uu socdo waxaa keliya oo duritaankooda la raacin karaa xukunka ama g'aanka ah in aan dacwadda la dhaqaajin karin oo isna xuku;n u dhigma (**Qod.119 XHC**). Sida uu qabo **Qod. 223 XHC,** duritaanbka lama aqbali karayo haddii:

i. qofka soo gudbiyay uu yahay mid aan xaq u laheyn;

ii. go'aanka la durayo uusan aheyn mid waqtigaas la duri karo;

iii. caddeynta iyo asbaabta duritaanka aan lagu soo gudbin qaabkii, waqtigii iyo goobtii sharcigu dalbayay;

iv. aan la meel marin gaarsiintii loo baahnaa;

v. laga tanaasulay duritaanka.

Maxkamaddu, marka ay geleyso dacwadda duritaanka uu keensaday Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, waxa ay baddeli kartaa qeexitaanka dembiga, kordhin kartaa ciqaabta, eedeysanaha ka qaadi kartaa waxyaabo dan ugu jirtay oo hore loo siiyay, dulsaari kartaana tallaabooyin amni. Haddiise duritaanka uu keensday eedeysanaha, kuma kordhin karto ciqaabta kamana qaadi karto waxyaabo dan ugu jirto oo hore loo siiyay, in kasta oo ay qeexitaan cusub siin karto demibga.

# Su'aalo

1. Sheeg xaaladaha wax la duri karo iyo waxa la duri karo.
2. Ka hadal habraaca loo sameeyo duritaanka.
3. Maxey kala yihiin caddeynta duritaanka iyo asbaabta duritaanka?
4. Sheeg muddooyinka kala duwan ee duritaanka.

# Cutubka

# 8aad

## RAFCAANKA LOO QAATO MAXKAMADDA RAFCAANKA

**Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:**

1. Barashada xaaladaha ay Xeer Ilaalintu rafcaan u qaadan karto Maxkamadda Rafcaanaka.
2. Barashada xaaladaha uu eedeysanuhu rafcaan u qaadan karo Maxkamadda Rafcaanaka.

Sida uu qabo **Qod. 227 XHC,** dhinacyadu waxa ay rafcaan u qaadan karaan Maxkamadda Rafcaanka, kaas oo sharcigu u habeynayo sida soo socota:

a. Rafcaanka la soo qaato marka eedeysanaha la sii daayo iyo marka dembiga lagu xukumo:

i. Eedeysanaha ayaa rafcaan ka soo qaadan kara marka demiga lagu xukumo, cafis garsoor loo fidiyo si waafaqsan **Qod. 126 XHC** ama la dulsaaro tallaabooyin amni.

ii. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa rafcaan soo qaadan kara marka eedeysanaha la sii daayo ama dembiga lagu xukumo labada jeer ba.

b. Rafcaanka laga soo qaato go'aannada ku saabsan in aan dacwadda la dhaqaajin karin:

i. Eedeysanaha ayaa rafcaan ka soo qaadan kara marka la dul saaro tallaabooyin amni.

ii. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa rafcaan ka soo qadan kara.

c. Rafcaanka laga soo qaato go'aannada ku saabsan xorriyadda qofka:

i. Eedeysanaha ayaa rafcaan ka soo qaadan kara.

ii. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa rafcaan ka soo qadan kara.

d. Rafcaanka lidka ku ah xukunnada la xiriira danaha maddaniga ah:

i. Eedeysanaha ayaa rafcaan ka soo qaadan kara.

ii. Dhibbanaha ayaa rafcaan ka soo qaadan kara.

e. Qareenka ayaa rafcaan ka soo qaadan kara go'aannada isaga lidka ku ah si waafaqsan **Qod. 16 XHC.**

Rafcaanka loo soo qaato Maxkamadda Rafcaanka waxaa la oggolaan karaa marka ay jiraan asbaab ku saabsan fal iyo sharci midkii ay noqota ba. Qodobbada habeynaya dhegeysiga dacwadda darajada kowaad waxaa lagu dabbaqayaa, intii suuragal, dhegeysiga dacwadda Maxkamadda Rafcaanka (**Qod. 230 XHC**). Marka la dhegeysanayo dacwadda Maxkamadda Rafcaanka, waxaa marka hore hadalka ku horreynaya dhinaca rafcaanka soo qaatay, dabadeedna waxaa hadalka qaadanaya dhinaca kale. Haddii labada dhinac uu mid kasta ba soo qaatay rafcaan, waxa marka ugu dambeysa la dhegeysanayaa rafcaanka eedeysanaha.

# Su'aalo

1. Sheeg xaaladaha uu eedeysanaha rafcaan u qaadan karo Maxkamadda Rafcaanka.
2. Sheeg xaaladaha ay Xeer Ilaalintu rafcaan u qaadan karto Maxkamadda Rafcaanka.
3. Si kooban u tilmaan habraaca dacwad qaadista Maxkamadda Rafcaanka iyo qodobbada lagu dhaqayo.
4. Asbaabtee saldhig u noqon karta rafcaan u qaadashada Maxkamadda Rafcaanka?
5. Ka hadal habraaca loo maro ka tanaasulka duritaanka.
6. K a hadal xaaladaha aan duritaanka la aqbali karin.

# Cutubka 9aad

# CABASHADA LOO QAATO MAXKAMADDA SARE

**Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:**

1. Barashada Maxkamadaha xukunnadooda iyo go'aannadooda cabasho looga qaadan karo Maxkmadda Sare.
2. Barashada asbaabta sharci ee keeni karta in cabasho loo qaato Maxkmadda Sare.

Dhinacyada ku tilmaaman **Qod.227 XHC,** ayaa Maxkamadda Sare u qaadan kara cabasho lid ku ah xukunnada iyo go'aannada kale ee ka soo baxa Marxkamadda Rafcaanka ama kuwa ka soo baxay Maxkamadda darajada kowaad ee aan rafcaan laga qaadan karin (**232 XHC**). Cabashada Maxkamadda Sare waxaa la oggolaan karaa oo keliya marka ay jiraan asbaabta sharci ee ku tilmaaman Qod. 10 Xeerka Nidaamka Garsoorka 1962, kuwaas oo kala ah:

3. Awood garsoor ama ikhtisaas la'aan;
4. Ku xadugudub ama si khaladan u dabbaqid qodobbo sharciyeed;
5. Go'aanka ama habka dacwad qaadista oo waxba kama jiraan ah;
6. Sababeyn la'aan, si ku filan u sababeyn la'aan iyo sababeyn isburrineysa oo la xiriirta arrin halbowle u ah dacwadda oo laga filayay dhinacyada ama Maxkamaddu xafiis ahaan u soo bandhigi karto.

# Su'aalo

1. Sheeg Maxkmadaha xukunnadooda iyo go'aannadooda cabasho looga qaadan karo Maxkamadda Sare.
2. Sharraxaad ka bixi asbaabta sharci ee saldhig u noqon karta in cabasho loo qaato Maxamadda Sare.

# Cutubka 10aad

# DIB U EEGISTA LOO QAATO MAXKAMADDA SARE

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:

1. Barashada xaaladaha saldhig u noqon kara in dib u eegis loo qaato Maxkamadda Sare.
2. Barashada goorta aan la aqbaleynin arjiga dib u eegista.
3. Barashada qofka codsan kara dib u eegis.
4. Barashada siyaabaha kala duwan ee uu ku imaan karo xukunka Maxkmadda Sare ee dib u eegista qaadeyso.

Dib u eegista waxaa loo qaataa Maxkamadda Sare marka ay jiraaan xaaladaha soo socda:

A. Haddii xukunka eedeysanaha dembiga lagula xukumay kadib ay soo baxaan falal ama caddeymo cusub kuwaas oo gooni ahaan ama haddii kuwii hore loo hayay lagu daro muujin kara in dembigu uusan dhicin ama eedeysanuhu uusan aheyn qofkii galay.

B. Haddii ay caddaato in xukunka eedeysanha dembiga lagula xukumay loo cuskaday dokumenti ama go'aan been abuur ah ama fal kale oo xagga sharciga dembi ku ah, arrimahaasna ka soo if baxeen xukun dhaqan galay.

C. Haddii falalka loo cuskaday xukunka eedeysanaha dembiga lagula xukumay aan ay la jaan qaadi karin kuwo kale oo lagu sugay xukun ciqaabeed oo dhaqan galay (**Qod. 238 XHC**).

Si kastaba, arjiga dib u eegista lagu codsanayo lama aqbalayo haddii uusan ku saleysneyn waxyaabo haddii la hubiyo meesha ka saarayo ama muujinayo in aan caddeymo loo heynin in dembi dhacay ama uu eedeysanuhu yahay qofka galay. Midda kale, dib u eegista waqti kasta ayaa la oggolaanayaa haddii ay dan u tahay dadka xukunsanayaasha ah (**Qod. 237 XHC**).

Dib u eeggista waxaa codsan kara xukunsanaha, Xeer Ilaaiyaha Guud iyo asalka, faraca ama qofka u dhaxay xukunsaha haddii uu isagu geeriyooday (**Qod. 239 XHC**). Haddii Maxkamadda Sare ay oggolaato dib u eegista si waafaqsan **Qod.240 XHC,** waxaa la dhegeysanayaa dacwadda dib u eegista iyadoo intii suuragal ah lagu dabbaqayo qodobbada dhegeysiga dacwadda darajada kowaad. Haddii Maxkamaddu ku qanacdo in waxyaabaha la hayo ay salysan yihiin waxa ay baabi'ineysaa xukunka dib u eegista laga soo qaatay. Haddii ay aragto in loo baahan yahay xaqiijin dheeraad ah waxa ay baabi'ineysaa xukunka dib u eegista laga soo qaatay waxeyna amreysaa in galka loo gudbiyo Maxkamadda ikhtisaaska leh. Haddii kale, waxa ay diideysaa arjiga dib u eegista (**Qod. 241 XHC**). Haddii Maxkamadda galka loo celiyay ay gaarto xukun ay eedeysanaha ku sii deyneyso, waxaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud u bannaan in uu rafcaan ka qaato xukunkaas. Haddiise Maxkamadda galka loo celiyay ay waafaqdo xukunkii dib u eegista lagu duray, ma noqonayo xukunkeeda mid laga hor imaan karo, in kasta oo Maxkamadda Sare loo gudbin karo dib u eegis ku saleysan asbaab cusub.

## Su'aalo

1. Ka hadal xaaladaha saldhig u noqon kara in dib u eegis loo qaato Maxkmadda Sare.
2. Goorma ayaan la aqbali karin arjiga dib u eegisata?
3. Yaa codsan kara dib u eegis?
4. Ka hadal siyaabaha kala duwan ee uu ku imaan karo xukunka Maxkamadda Sare ee qaadeyso dacwadda dib u eegista.

# Cutubka
# 11aad

## HEERKA FULINTA

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:

1. Barashada goorta xukunnada la fulin karo.
2. Barashada kaalinta Xeer Ilaalintu ku leedahay fulinta xukunnada.
3. Barashada habraacyada ku saabsan fulinta xukunnada ciqaabta dilka ah.
4. Barashada habraacyada ku saabsan fulinta xukunnada xarigga.

Xukunnada waxaa la fuliyaa marka ay dhaqan galaan ama sharcigu oggol yahay in si ku meel gaar ah loo fuliyo. Xukunnadu waxa ay dhaqan gal noqdaan marka uusan ka furneyn wax duritaan ah oo aan ka aheyn dib u eegis. Xukunnada sii deynta waxa ay dhaqan gal noqdaan isla marka lagu dhawaaqo. Dhaqangalnimada go'aannada ku saabsan in aan dacwadda la dhaqaajin karin waxa ay la mid tahay midda xukunnada intii suuragal ah (**Qod. 246 XHC**).

Marka uu jiro xukun dil ah oo dhaqan galay, Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa laga doonayaa in uu si deg deg ah ula xiriiro Maxkamadda Sare iyo Wasiirka Cadaaladda si loogu tallaabsado fulinta xukunkaas maxkamadduna u soo saarto amarka socodsiinta fulinta oo lagu xaddidayo taariikhda xukunkaas xukunsanbaha lagu fulinayo iyo waqtiga iyo goobta lagula fulinayo intaba, iyadoo amarkaas u gudbineysa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (**Qod. 248 XHC**).

Fulinta ciqaabta dilka waxaa goob joog ka noqonayo qof matalaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, dhakhtar uu isla Xafiisku magacaabay iyo wadaad aaminsan diinta xukunsanaha dilka lagu fulinayo haddii uu isagu codsado. Fulinta ciqaabta dilka dib ayaa loo dhigayaa haddii xukunsanaha uu dalbaday cafis ilaa natiijo ka soo baxeyso dalabkaas, ama ay tahay haweeney uur leh ilaa ay ka dhaleyso ama mid umushay waqti laga joogo hal sano haddii laga reebo marka canuggu ka dhinto ama qof xannaaneeyo loo dhiibay dhalmadana ay ka soo wareegtay waqti aan ka yareyn laba bilood.

Haddii xukunka dhaqan galay uu yahay mid xukunsanaha lagula xukumay ciqaab xarig ah, Guddoomiyaha Maxkamadda darajada koowaad ee xukunkaas ku dhawaaqday ayaa soo saaraya amarka xabsi ku heynta xukunsanaha una gudbinayo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si uu u fuliyo isagoo raacinaya nuqul ka mid ah xukunkaas (**Qod. 249 XHC**).

Haddii xukunsanuhu uu ku jiro xabsi ku heyn ku meel gaar ah, mas'uuliinta xabsiga ayaa iyana nuqul looga dirayaa amarka xabsi ku heynta. Amarka xabsi ku heynta waa in lagu xuso nooca iyo tirada ciqaabta uu xukunsanuhu tirsanayo iyo taariikhda la doonayo in la sii daayo haddii aan dembi kale loo heysan, iyadoo aan loo baahanin in la soo saaro amar lagu sii deynayo. Guddoomiyaha Maxkamadda ikhtisaaska u leh soo saaridda go'aanka fulinta ayaa ikhtisaas u leh in uu wax ka qabto waxyaabaha ka dhasha fulinta g'aankaas (**Qod. 257 XHC**).

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ama qofka danlaha ah waxa uu awood u leeyhay in uu maxkamadda ikhtisaaska leh u soo gudbiyo wixii arrimo ah ee fulinta ku lug leh, iyadoo Guddoomiyaha Maxkamadda uu arrintaas go'aan ka qaadan doono, kadib markii uu dhinacyada u qabto muddo macquul ah (**Qod. 258 XHC**).

## Su'aalo

1. Ka hadal kaalinta Xeer Ilaalintu ku leedahay fulinta xukunnada ciqaabta.
2. Waa maxay habraacyada loo maro fulinta ciqaabta dilka ah.
3. Waa maxay habraacyada loo maro fulinta ciqaabta xarigga ah.

# Cutubka 12aad

# XAFIISKA DIIWAANGELINTA DEMBIYADA

**Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:**

1. Barashda cidda ka mas'uulka ah Diiwaangelinta Dembiyada.
2. Barasshada kaalinta Xeer Ilaalintu ku leedahay diiwaangelitna dembiyada.
3. Barashada waxyaabaha lagu uruuriyo Xafiiska Diiwaangelinta Dembiyada.

Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa toos uga mas'uul ah maamulka iyo kormeerka Xafiiska Xog Uruurinta Garsoorka oo isagu ah qeyb ka tirsan Taliska Ciidanka Boliiska (**Qod. 260 XHC**). Xafiiskan waxaa lagu uruurinayaa nuqullo ka mid ah go'aannada ka soo baxa hay'adaha garsoorka dalka iyo kuwa dibadda ee loo aqoonsaday si sharciga waafaqsan (**Qod. 260, 261 iyo 262 XHC**). Xafiiska Xog Uruurinta muhimad weyn ayuu u leeyahay garsoorka, waxaana Xeer Ilaaliyaha Guud laga doonayaa in uu dib u abuuro iyada oo la dhaqan gelinayo **Qod.260-271 XHC.**

## Su'aalo

1. Yaa ka mas'uul ah diiwaangelinta dembiyada?
2. Waa maxay kaalinta Xeer Ilaalinta kaga aaddan hawlaha Xafiiska diiwaangelinta demibyada?
3. Maxaa lagu uruuriyaaa Xafiiska Diiwaangelinta Dembiyada?

# Cutubka 13aad

## ISKAASHIGA CAALAMIGA AH EE XAGGA DEMBIYDA

## Ujeeddooyinka laga hiigsanayo Qeybtan waxa ay yihiin:

1. Barasahda noocyada codsiyada caalamiga ah.
2. Barashada habraacyada la xiriira codsiyada caalmaiga ah iyo u yeeridda markhaatida dalka dibaddiisa ku sugan.
3. Barashada kaalinta Xeer Ilaainta ee la xiriirta codsiyada caalamiga ah iyo baarista dembiyada ay dalka gudihiisa ka fuliyaan hay'ado shiheeye.
4. Barashada siyaabaha ay ku timaado wareejinta dembifalayaasha.
5. Barashada noocyada ay noqon karto wareejinta dembifalayaasha.
6. Barashada habraacyada wareejinta dembifalayaasha.
7. Barashada habraacyada aqoonsiga xukunnada shisheeye ee ciqaabta ah.
8. Barashada kaalinta Xeer Ilaainta ee aqoonsiga xukunnada shisheeye ee maddniga ah.
9. 

## QEYBTA KOWAAD

### CODSIYADA CAALAMIGA

Codsiyada ku socda hay'ado garsoor oo ajnabi ah kuna saabsan hawlo baariseed oo dibadda laga fulinayo waxaa loo gudbinayaa hay'adahaas iyadoo loo marinayo dariiqa dibloomaasiga ah (**Qod. 276 XHC**). Marka ay jiraan xaalado deg deg ah, maxkamaddu waxa ay toos codsiyadaas ugu gudbin kartaa diblomaasiyiinta iyo hawlwadeennada qunsuliyadda dibadda, iyaddo ku wargelineyso Wasiirka Cadaaladda. Isla qaababkan ayaa loo raacayaa u yeerista markhaatida dibadda deggan. Codsiyada ka yimaado hay'ado garsoor oo ajnabi ah kuna saabsan hawlo baariseed oo dalka gudihiisa laga hirgelinayo waxa ay dhaqan gal ku noqon karaan go'aan uu saaro Guddoomiyaha Maxkmadda Rafcaanka kadib marka uu dhegeysto ra'yiga Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, iyadoo mar kasta ba loo baahan yahay in ayna ka horimaanin mabaadii'da guud ee hab sharciyeedka Soomaaliyeed (**Qod. 277 XHC**).

Haddaba, iyadoo garsoorka Soomaaliyeed ay meel marinayaan maxkamadaha dalka sida ku cad Qod.1aad XHC., waxaa loo baahan yahay in Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud uu ku dadaalo in hawlgallada garsoor oo ay fulinayaan hay'ado garsoor oo ajnabi ah la waafajiyo sharciga, hay'adahaasna lagu wargeliyo in codsigooda u soo gudbiyaan Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka si markaas Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud uu ra'yigiisa uga dhiibto.

Hawlgallada garsoor ee noocaan ah wey badan yihiin siiba haddii la tixgeliyo ajendaha caalamiga ah ee ka hortagga argagixsada. Sida sharcigu qabo, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa looga baahan yahay in uu si toos ah ugu yeero markhaatida ay hay'ado garsoor oo ajnabi ah doonayaan in dalka gudihiisa ku dhegeystaan (Tirsiga 2aad ee Qod. 277 XHC). Sidaas darteed, Xeer Ilaaliyaha Guud waa in uu arrintan siiyo mudnaanta koowaad si loo xaqiijiyo habsami u socodka hawlaha garsoorka dalka.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa oggolaan kara dhammaan hawlaha ku saabsan baarista iyo daba galka dembiyada oo ay dalka gudihiisa ka fulinayaan boliis ama hay'ado sirdoon shisheeye.

## QEYBTA LABAAD

### WAREEJINTA DEMBIFALAYAASHA

Wareejinta dembifalayaasha waa qaab ka mid ah qaababka iskaashiga xagga garsoorka ee dhex mara dowladaha, qaabkaas oo ku yimaado laba siyaabood:

1. Dowlad oo ku wareejiso dowlad kale qof dalkeeda ku sugan si loo horgeeyo maxkamad ku qaadda dembiga loo heysto. Wareejintan waxaa loo yaqaan wareejinta dacwad qaadista.
2. Dowlad oo ku wareejiso dowlad kale qof dalkeeda ku sugan si loogu fuliyo ciqaab uu ku xukuman yahay.Wareejinta noocaan ah waxaa loo yaqaannaa wareejinta fulinta.

Wareejinta dembifalayaashu waxaa kale oo ay kala noqon kartaa:

A. Wareejinta firfircoon oo imaaneyso marka ay dowladi mid kale ka codsato in ay u soo wareejiso eedeysane ama xukunsane dalkeeda ku sugan.

B. Wareejinta aan firfircooneynoo imaaneyso marka codsiga wareejintu uu ka yimaado dowladda uu joogo xukunsane ama eedeysane loo heysto dembi uu ku soo galay dalkiisa.

Wareejinta dembifalayaasha waa in ay u dhacdaa si waafaqsan sharicga iyo heshiisyada caalamiga ah (**Qod. 11 XC**). Wareejinta dembifalayaasha lama meelmarin karo haddii faldembiyeedka awgiis loo sameynayo uusan faldembiyeed ka aheyn xagga sharciga Soomaaliyeed iyo midka qalaad. Midda kale, wareejinta lama sameyn karo haddii ay ku saabsan tahay dembiyo siyaasadeed (**Qod. 11 XC**). Qofka la wareejiyo laguma qaadi karo dembiyo ama ciqaabo ka duwan kuwii awgood wareejinta loo codsaday ama loo bixiyay (**Qod. 378 XHC**).Wasiirka Cadaaladda waxa uu codsiga ama bixinta wareejinta ku xiri karaa wixii shuruud uu u arko in ay haboon tahay.

Eedeysane ama xukunsane dalka gudihiisa ku sugan looma wareejin karo dibadda iyadoo aan go'aan arrintaas ku saabsan laga helin Guddoomiyaha Maxkmadda Rafcaanka oo uu xadkeeda ku sugan yahay qofka la wareejinayo, kadib marka uu dhegeysto ra'yiga Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo qofka la wareejinayo. Sidoo kale, Go'aanka Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka waxaa ka furan cabasho ay Maxkamadda Sare u qaadan karaan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo la wareejiyaha ba (**Tirsiga 1aad ee Qod. 279 XHC**).

Haddii Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka uu diido wareejinta eedeysane ama xukunsane ku sugan dalka dowlad shisheeyana ay soo weydiisatay warejintiisa waxa uu sii deynayaa qofka la codsaay wareejintiisa haddii uu xirnaa (**Qod. 280 XHC**). Haddiise Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka uu oggolaado wareejinta eedeysanaha ama xukunsanaha la soo weydiistay wareejintiisa waxa uu soo saarayaa amar lagu soo qabanayo qofka la soo codsaday wareejintiisa.

Marka la weydiisanayo dowlad shisheeye in ay soo wareejiso eedeysane ama xukunsane dalkeeda ku sugan, Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka ayaa codsiga sameyenaya isagoo ku wargelinaya Xeer Ilaaliyaha Guud (**Tirsiga 1aad ee Qod. 281 XHC**). Waxaa sidoo kale, codsigaas sameyn kara Wasiirka Cadaaladda isagoo ku wargelinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka iyo Xeer Ilaaliyaha Guud.

## QEYBTA SADDEXAAD

### AQOONSIGA XUKUNNADA CIQAABEED EE SHISHEEYE

Haddii Wasiirka Cadaaladda loo soo gudbiyo xukun ciqaabeed shisheeye ee dalka dibaddiisa looga dhawaaqay lidna ku ah muwaadin Soomaaliyeed ama qof ajnabi ama dhalasho laawe ah degaanna dalka waa in uu u sii gudbiyaa Xeer Ilaaliyaha Guud isagoo raacinaya wixii qoraallo ku lifaaqan ama macluumaad ah ee la xiriira (**fiiri Tirsiga 1aad ee Qod. 282 XHC**). Haddiise, Xeer Ilaaliyaha Guud ay la noqoto in uu codsado aqoonsiga xukun ciqaabeed shisheeye waxa uu codsigaas u gudbinayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka ee uu Xadkiisa ku yaal Xafiiska Xog Ururinta Garsoorka (**Tirsiga 2aad ee Qod. 282 XHC**).

Go'aanka lagu aqoonsanayo xukun ciqaabeed shisheeye waxaa Maxkamadda Sare cabasho uga qaadan karo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo qofka arrintu khuseyso labada ba (**Tirsiga 1aad ee Qod. 285 XHC**). Haddii go'aanka aqoonsiga xukun ciqaabeedka shisheeye aan lagu xusin natiijooyinka ka dhalankara go'aankaas, Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka ayaa dib ka soo sheegaya isagoo ka shidaal qaadanaya codsiga Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (**Tirsiga 4aad ee Qod. 285 XHC**).

Xagga xukunnada maddaniga ee shisheeye, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu awood u leeyahay in uu soo dhexgalo kuwa ku saabsan dadka taagta daran sida agoonta, ilmaha aan qaangaarka aheyn, curyaamiinta iyo dadka gaboobay. Sidoo kale, Xafiisku waxa uu kaalin ka qeybgal ku leeyahay xukunnada maddaniga ee shisheeye ee ku saabsan qayimnimada iyo kuwa ku saabsan qof laga shirayo ku takrifalka hantidiisa.

## Su'aalo

1. Waa maxay noocyada codsiyada caalamiga ah?
2. Ka hadal habraacyada codsiyada caalamiga ah iyo u yeeridda markhaatida dalka dibaddiisa ku sugan.
3. Waa maxay kaainta Xeer Ilaalintu ay ku leedahay codsiyada caalamiga ah iyo u yeeridda markhaatida caalamiga ah?
4. Waa maxay siyaabaha ay ku timaado wareejinta dembifalayaasha?
5. Waa maxay noocyada wareejinta dembifalayaasha?
6. Sharraxaad ka bixi habraacyada wareejinta dembifalayaasha.
7. Ka hadal habraacyada loo maro aqoonsiga xukunnada shisheeye ee ciqaabta ah.
8. Waa maxay kaalinta Xeer Ilaalintu ku leedhahay aqoonsiga xukunnada shisheeye ee maddaniga ah?